

Qiimaha dugsiyada dawlada ee NSW

Values in NSW public schools

Macluumaadka loogu
talagalay waalidiinta iyo
xannaaneeyayaasha

Information for
parents and
carers

Hadalka ka yimid Wasaaradda ee
https://www.det.nsw.edu.au/policies/student_serv/student_welfare/valu_scool/pd_05131_Values.pdf

Siday u wajaheyso NSW qiimayaasha iyo qiimaha waxbarashada ee dugsiyada dawlada

Qiimayaasha

Dugsiyada dawlada ee NSW waxay had iyo jeer bari jireen qiimayaasha aasaaska u ah sharciga, dhaqanka iyo daryeelka dadka kale ee bulshada ku jira.

Dugsiyada NSW waxay la wadaagaan qoysaska iyo bulshada masuuliyada baridda qiimayaasha. Halka qiimayaasha inta badan lagu barto guriga oo waxna looga bedelo xirriirada iyo khibrada nololaha ee ku saabsan qiimayaasha badanaa la wadaago iyo sidoo kale kuwa dugsiyada lagu dhigo.

Ku muujinta qiimayaashan dhammaan goobaha waxbarashada dawlada ayaa ah labadaba ujeedada iyo cabiraada guusha ee dugsiyada dawlada.

Qiimayaasha waxbarashada

Dugsiyada dawladu waxay baraaan qiimayaasha, oo ay ka mid yihiin qiimayaasha qorsheeya waxbarashada. Dugsiyada dawlada waxay sidoo kale siiyaan ardeyda fursado ay ku sahamiyaan qiimayaasha ka danbeeya qaababka bulshada kala duwan ee arimaha siyaasadeed iyo waxyaalaha la saluugsan yahay bulsho ahaan.

Qiimayaasha waxaa loogu dhigaa si toos ah fasalada iyadoo la adeegsanayo naashaadyo iyo xirriirada dugsiyada iyo bulshadiisaba. Dugsiyada dhexdooda, qiimayaasha ugu waa weyn ayaa saameeya sida ay dadku u wada hadlaan, uwada shaqeeyaan iyo siday go'aamo u gaadhaan. Waxay ku muujisan yihiin siyaasadaha iyo nidaamyada dugsiyada iyo Wasaaradda.

Qiimayaasha ugu waa weyn

Dawlada waxay aqoonsan tahay muhimada qiimayaasha muhiimka ah ee soo socda ee ay u leeyihiin bulshada. Qiimayaashani waxay metelaan hamiga waxay rumeysan tahay bulshada Australianka ahi dhammaanteed, oo ay ku jiraan waxay ka saluugsan yihiin sinnaanta, bulshada madaniga ah ee caadiga ah. Waxaana laga helaa fikradaha aduunka ee diimeed iyo kuwa aan diinta ku saleysaneyn ee laga helo dhaqamada badidooda.

Qiimayaasha ugu waa weyni waa:

DAACADNIMO	Daacad u ah si joogta ah oo lagu kalsoonaan karo.
AAD U WANAAGSAN	Ku dadaalaya meesha ugu sareysa ee qof shakhsi ah gaadho dhammaan dhinacyada dugsiyada iyo shakhsi ahaanba iyo ficilka bulshadaba, shaqo iyo waxbarasho nololeedka oo dhan.
XUSHMAD	Tixgelinta nafsadaada iyo kuwa kaleba, wixii sharci ah iyo awood cadaalad ah iyo kala duwanaanta ee ka jirta bulshada Australianka ah iyo aqbalida xaq kuwa kale inay yeeshaan fikrado kala duwan ama iska soo horjeeda.
MASUULIYAD	Masuul ka ahaanshaha ficilkaaga shakhsiyeed ee bulshada ee ku aadan nafsad ahaantaada, kuwa kale iyo degaankaba.
WADA SHAQEYNTA	Wada shaqeynta si loo gaadho ujeedooyin loo siman yahay, siinta taageero kuwa kale iyo dhexgelida xalinta nabdoon ee khilaafaadka.
KA QAYBQAADASHADA	Ahaanshaha shakhsi wax soo saar leh oo iyo waxqabad oo ka mid ah koox, oo ay lana weyntahay oo wax ka geysanaya hantida dhaqaalaha bulshada iyo qarankaba.
DARYEELKA	Tixgelinta wanaaga nafsadaada iyo kuwa kale, muujinta fahamka iyo wax u qabashada si naxariis leh.
CADAALAD	Ka gonaanta xeerarka caddaalada bulshada iyo ka horimaadka naceybka, daacad darida iyo caddaalad daridaba.
DIIMUQRAADIYADA	Aqbalida iyo kor u qaadida xuquuqda, xoriyada iyo waajibaadka ahaanshaha wadani Australian ah.